

BIXINTA XANAANADA GURIGA

Qaadashada lisenka si aad ku sameeyso Xanaanada Caruurta ee Qoyska ee Gurigaada

Gobolkan Washington, qof kasta oo lacag lagu siiyo inuu ku xanaaneeyo ilmo gurigiisa si joogto ah oo caadiya, waxa looga baahan yahay inuu lisenka (haddii caruurta aanu wax xiriira idinka dhaxayn). Midani macnaheedu waxa uu yahay in xanaanada carrurta ee qoyska ay qasab ku tahay inay u haystaan lisen ay ku hayaan ilmaha haddii ay caruurtaasi ka baxsan yihiin qoyskaada kugu dhow. Waxaad qaadan kartaa lisen aad ku haynayso ilaa iyo 12 caruura iyadoo ay ku xiran tahay tirada qoyskaada iyo intuu la egtahay gurigaada, waxbarashadaada, iyo tababarkaada iyo haddii aad haysato qof ku caawiya. Waxa qasaba inaad ku nooshahay guriga aad ilmaha ku hayso.

Faa'iidooyinka Lisenka

- Inaad noqoto qof lisen leh wax dhib badan ma aha iyo waqti kagama uu dhumayo. Waxaa intaa dheer in sharcigi ahaan in lagaaga baahan yahay, noqoshada bixiye xanaanada caruurta waxay ku sahlaysaa in si lacag la'aan ah laguugu soo qoro liiska ilaha u dirida xanaanada caruurta. Si laguugu qoro, wac (206) 329-5544.
- Waxaad ka mid noqon kartaa barnaamijka cuntada ee Federal-ka, kaasoo dib kuugu celinaya qaar ka mid ah qarashka kaaga baxa cuntada.
- Waxaad heli kartaa faa'iiddoyin xaga Canshuurta, Wixii warar ah ee la xariira waxyaabaha lagaaga baahan yahay inaad heyso, Kala xariir IRS 1-800-829-1040. Ilaha buugaagta ay ku qoran yihiin canshuuraha waxa laga helaa Redleaf Press 1-800-423-8309.
- Waxaad iibsan kartaa caymiska loo baahan yahay.
- Waxaa lagu soo diri doonaa Gobolka Lisenkiisa ilo ahaan.
- Waxaad ka faa'iidaystaan kartaa dhow waxyaabod oo ilaha bulshada.
- Waxaad isku soo qori kartaa joornaalka degaanka.
- Waxaad heli kartaa Kaarka Xubinimada Costco.

Haddii aad doonayso inaad biloowdo Barnaamijka Xanaanada Caruurta ee gurigaada, talabada ugu horaysaa waxay tahay inaad ka soo qeyb gasho Tababarka Qeybta Xanaanada Caruurta iyo Waxbarashada Hore, Waxaad ku baranaysaa sharciyadaa Lisenka iyo lagu siinayaa waraaqaha Arjiga iyo sida loo soo buuxiyo, Sharciyada Gobolka, iyo warar dheeraada. Lisenka qofka bixiye ayaa joogaya si uu uga jawaabo su'aalaha qaaska ah. King County waxa loo qeybiyaa 2 lisen bixiye, Waxaad ka soo qeyb geli kartaa mid kii aad doonto iyadoo aan loo eegayn meesha aad degan tahay.

Riix halkaan Waxyaabaha laga Doonayo Lisenka - (Dhamaanba)

- ▶ **Qeybta Xanaanada Caruurta iyo Waxbarashada Hore - Region 4A (Seattle)** Fadlan ogow: **Region 4A Web Site-koodu hada ma shaqeeyo - Fadlan soo wac 206 721-6941 wixii warar ah.**
- ▶ Raadi Lisenkaaga qofka bixiye
- ▶ Salka Oryenteenshanka
- ▶ Jadwalka Oryenteenshanka

- ▶ **Qeybta Xanaanada Caruurta iyo Waxbarashada Hore - Region 4B (Kent)**
- ▶ Shaqaalaha Lisenka
- ▶ Oryenteenshanka & Waarka salka ee bixiyayaasha

Ilaha Xanaanada Caruurta waxay leeyihiin shaqaale kaa caawini kara inaad qaadato Lisenka.

- ▶ **Shaqaalaha Caawinaada Lisenka.**